



Daminta Ama Goynta/Jarida Kulaylka

Heat Shut-Offs


Hadii aadan iska bixinin kharashka korontada iyo gaaska ee loo yaqaan (utility bills), addeega waa lagaa xidhi ama lagaa goyn. Tani way dhici kartaa xitaa xiliga qaboobaha. Lakiin waxaa laga yaabaa in inta u dhaxaysa Bish 10 (October) 15, ilaa iyo Bisha 4 (April) 15 in lagaa difaaci karo. Qoraalkani wuxuu ku saabsanyahay korontada iyo gaaska hadii looga baahto kulayl. Shuruucdu waxay saameeyaan xitaa guryaha shaqsiyaadku khaas u leeyihiin. Shuruucdu waa isku mid ee kuwa guriyanta dowladaha hoose ay leeyihiin. Shuruucdu ma khuseeyaan kuwa saliida, dhuxusha, iyo qoryaha.

Hor U Qorshayso Kharashkooda

Si aad uga hortagto in lagaa jaro la soco kharashka lagaaga baahanyahay inaad bixiso. Inta aadan gali guriga, ka hel mulkiilaha iyo kii ka horaeyayba inta kharash lagu leeyahay guriga ee koronto iyo gaas. Ka bacdi isku day inaad kharashkaaga ka bixiso. Kharashkaagu aad buu u badan xiliga qaboobaha. Haayada korontada iyo gaasku waxay ku siin qorshe aad ku bixiso. Qorshe kharash bixin (Budget Plan) waxaad bixinaysaa isku kharash bilkasta ee sanadka.

Caawimaad Raadso

Waxaa laga yaabaa inaad hesho gargaarka (tamarta) korontada iyo gaaska. Waxay ka cawiyaan xaalada degdega ah ee bixinta biilka ama kharashka caadiga ah ee korontada iyo gaas si looga hortago in la jaro. Wac, waxa loo yaqaan (First Call for Help) ee gobolka oo dhan ee lambarkoodu yahay 211 ama 1-800-543-7709 si aad u ogaato cawimaada korontada iyo gaaska. Wac meesha kuugu dhow.



Waxaa laga yaaba inaad cawimaad ka hesho (MFIP) ka yacni caydha, hadii aad caruur leedahay, (MSA) hadii aad SSI-da qaadato. Wac ama laxiriir xafiiska degmada ee addeega bulshada. Hadii uu biil kaagu ama kharashkaagu badanyahay waayo mulkiiluhu (landlord), ma hagaajinayo wax ka khariban guriga, hubso inuu hagaajiyo waxa khariban. Waxa aad eegtaa baalkayaga xaqiiqada ee, [Ka Helida laga helayo in Qofka quriga lehi uu Hagaajiyo wixii Halaaba.](#)

Hadii Uu Biilkaagu/Kharash Kaagu Yahay Mid Qaldan

Hadii aad u malaynayso in ay haayadu khalad samaysay, si dhakhsi ah ugu sheeg. Waa in ay haayadu:

- Xaqiiqada dhakhso u fiirisaa.
- Waa inay kuu sheegaan sida ay u dhacday iyo waxaa ay heleen; iyo waliba
- Sidii ay kuula shaqayn lahayeen si dhibta loo xaliyo ama loo hagaajo.

Kaa' ma xidhi karaan ilaa iyo inta ay ka baadhayaan ayna kaaga sheegayaan waxa ay soo saareen oo qoraal ah.

Hadii aadan wali ku qanacsanayn, wac xafiiska gargaarka sharciga (legal aid) ee Gudiga Xooga Korontada iyo Gaaska (Public Utilities Commission) oo laga helo (651) 296-0406 ama 1-(800) 657-3782 ama Minnesota Attorney General (651) 296-3353 ama 1(800) 657-3787.

Xidhitaanka Tamarta Xiliga Qaboobaha

Hadii aadan awoodin inaad bixiso kharashkaaga korontada iyo gaaska xiliga qaboonaha ee u dhaxaysa Bish 10 (October) 15, iyo Bisha 4 (April) 15, hayaadu kaama xidhi karto ama goyn karto hadii aad sameyso qorshe aad biilka ku bixiso. Marka aad la hadasho haayada korontada iyo gaaska, samee qoraalo aad ku muujinayso qofkii aad la hadashay iyo waxa ay ku yidhaahdeen. U qor warqad sheegaysa waxa uu qorshuhu yahay. Koobi ka samayso.

Haddii aadan haysan meel aad seexato ama dhici karto in aad weydo meel aad seexato xilliga qaboobaha, shirkada tamarta waa in ay samayso dadaal macquula si ay dib ugu soo celiso adeegayda muddo 24 saacaado kaddib marka ay helaan qorshaha lacag bixiskaaga.

Ma' Aha In Wax Walba Aad Bixisay Ama Lagaa Bixiyay Ilaa Iyo Bisha 10 (October) 15, Si Aad U Hesho Badbaadada Ka Xidhida Tamarta Ama Korontada Iyo Gaaska

Hadii aad dagan tahay guri guriyanta, sharcigani wuxuu kuu shaqaynayaa hadii jarida korontada iyo gaasku saamayn ku yeelanayaan kulayka ama tamarta guriga (heat).

Hayad walba ee Tamarta, waxaad leedahay laba fursadood:

1. Qorshaha bixinta kharashka ama biilka.

Waxaad la qorshayn kartaa haayada korontada iyo gaaska dhamaan xiliga qaboobaha inaad bixiso bil kasta lacag cadadan. Lacagtani waxay ka yaraan kartaa bilka oo dhamaystiran. Lacagtu waa inay noqotaa mid suurta gal ku ah dhaqaalahaaga. Lagaa goyn mayo hadii aad bixiso lacagta qorshaha marwalba. Wac haayada hadii aadan bixin karin kharashka qorshaha xilikasta oo ay taasi timaado.



2. Qorshaha.

Marna lagaa jari mayo mar walba oo aad bixiso 10% ee dhaqaalahaaga oo aad ku bixiso korontada iyo gaaska. Hadii aad dhamaan bixiso kharashka lagaa jari mayo. Gargaarka koronda uma qalmo dakhli dhaqaale. Hadii aad korontada ka hesho haayad gaaskana haayad kale 10% waxaad u qaybinaysaa labada haayadood.

Waxa Loo Yaqaan Addeega Xadidan

Haayada korontada iyo gaasku waxay leeyihiin waxa loo yaqaan (service limiters) oo macnaheedu tahay in ay xadidaan korontada iyo gaaska aad rabto. Xiliyada qaboobaha haayaduhu ma samayn karaan mid noocaas ah. Waa daruuri ama laasim inay raacaan qaynuunka.

- Waa inay ku siiyaan digniin.
- Waa inay ku siiyaan mid ka mid ah labada fursadood ee kor ku xusan.

Hadii aysan qaynuunka raacin sharcigii bay jabiyeen. Wac xafiiskaaga (legal aid) ee khuseeya korontada iyo gaaska. Waa (Public Utilities Commission (PUC) oo laga helo (651) 296-0406 or 1-(800) 657-3782.

Racfaanada (Appeals)

Hadii aysan haayada (utilities) samaynin qorshe lacag bixin, waxaad u caban kartaa (PUC) da. Si dhakhsi ah saas u samee, wakhtigu aad buu u ordayaa. Wac xafiiska (legal aid) ee kuugu dhow.

Si aad racfaan u qaadato:

- Ka codso haayada (utilities), waa korontada iyo gaaska ee, arji racfaan. Hadii aysan ku siin wac gudiga (PUC) oo ka hel arji, hoos ka fiiri. Buuxi arjiga oo u dir (PUC). Waa inaad arjiga u gudbisaa (PUC) 7 casho gudahooda ee maalinta digniinta goynta (shut off notice).
- Gudiga (PUC) ayaa samaynaya qorshe lacag bixin 30 casho gudahooda. Inta u racfaanku socdo lagaama xidhi karo tamarta.

Hadii Uu Dhaqaalahaagu Is Badalo Adoo Qorshe Ku Jira

Hadii wax dhacaan oo dhaqaalahaagu is badalo oo aadan lacagta heli karin si aad u bixiso kharashka ee qorshahaaga lacag bixinta, si dhakhsi ah ula xiriir haayada si aad u badasho qorshaha lacag bixinta. Hadii aysan haayadu ogolaan in qorshaha la badalo, si dagdag ah u wac gudiga (PUC) si aad uga hor tagto jarid.

Waxaad ka heli kartaa Gudiga (Public Utilities Commission) (PUC)

Minnesota PUC
121 7th Place East, Suite 350
St. Paul, MN 55101
(651) 296-0406 or 1-(800) 657-3782



Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.

© 2020 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixii aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**